Xafiiska Bartayaasha Luuqada Ingiriiska

Bruce C. Bolling Building
2300 Washington Street, Roxbury, MA 02119
617-635-9435
ptahiliani@bostonpublicschools.org

Xaquuqda Waalidka

Adeegyada Turjumaada iyo Fasiraada

Dhamaan waalidiintu waxay xaq uleeyihiin helitaanka macluumaad kusaabsan waxbarashada caruurtooda oo loogusoo gudbiyo luuqad ay fahmayaan. Marka cunugaagu kubiiri dugsi, Degmada ayaa wax kaawaydiinaysa luuqada aad rabto in lagugula hadlo markaad dugsiga laxariirayso. Tani waxay dugsigaaga kacaawinaysaa inuu aqoonsado baahiyahaaga dhanka luuqada si ay markaas kuugu qabtaan turjumaan ama ay kuusiiyaan dukumiinitiyo turjuman, si lacag la'aan ah.

Waxa aad kafilan karto dugsigaaga iyo degmada dugsigaaga

Waxaad qayb muhiim ah katahay waxbarashada cunugaaga!
Dugsiga ayaa kulaxariiraaya—ayagoo kugula xariiraaya luuqada aad taqaano—markay kaaga waramayaan waxbarashada cunugaaga. Xariiradaan waxaa caadiyan kujira dukumiintiyo turjuman iyo turjumaan luuqadeed kaasoo laguu qabanaayo marka ay jiraan shirar ama wadahadal.

Xaq ayaad uleedahay adeegyadaan xataa hadaad xoogaa Ingiriiska taqaano iyo xataa hadii cunugaagu kuhadlo uuna qori karo luuqada Ingiriiska.

Dugsiga ayaa kugula xariiraaya **luuqadaada hooyo** markay kaala hadlayaan macluumaadka iyo fursadaha muhiimka u ah cunugaaga. Waxaa kujira macluumaad kusaabsan:

- Isdiiwaangalinta iyo qorista ardayga ee dugsiga
- Buundooyinka, heerarka aqooneed, iyo qalinjabinta
- Xeerarka dugsiga iyo anshaxa ardayga
- Xaadirida, maqnaanshaha, iyo kabixida
- Fasaxa waalidka ee hawlaha ama barnaamijyada
- Caafimaadka, badqabka, iyo xaaladaha degdega ah
- Xiliyada dugsiga laxiraayo
- Fursadaha helitaanka barnaamijyada iyo adeegyada—ayna kujiraan barnaamijyada meelaynta gaarka ah iyo Bartaha Ingiriiska
- Waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada ardayda naafada ah

Kulanada iyo wadahadalka lala yeelanaayo macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga
Markaad lahadlayso macalimiinta ama shaqaalaha dugsiga, dugsiga ayaa kuukeenaaya turjumaan hadaad ubaahantahay. Kulanadaan waxaa kamid ah shirarka waalidka iyo macalinka, shirarka kusaabsan waxbarashada gaarka ah, ama wadahadal kasta oo kale kuna saabsan waxbarashada cunugaaga.

Higsigeenu waa inaan bixino waxbarasho tayo leh dhinacyada dhaqanka iyo luuqadaba ayadoo taageerada ay ubaahan yihiin siinaysa ardayda si loo xaqiijiyo helitaanka fursado loosimanyahay oo kor uqaadaaya barashada luuqada, kuhadlida labo luuqadood, aqoonta labo luuqadood iyo waxbarasho nolosho oo dhan socota.

Boston Public Schools
Laura Perille, Maamulaha Kumeelgaarka ah

Gudigga Dugsiga ee Boston
Michael Loconto, Madaxa

Magaalada Boston
Martin J. Walsh, Duqa magaalada

Dugsiga ayaa adeegsanaaya kaliya turjumaano tayo leh kuwaasoo aqoon faseex ah uleh Ingiriiska iyo luuqadaada hooyo. Dugsiga ayaa xaqiijinaaya in turjumaanadu ay fahmaan erayo kasta ama fikrado kasta oo la adeegsanaayo inta kulanku socdo. Dugsiga ayaan adeegsan karin ardayda ama caruurtu inay turjumaan unoqdaan.
Tuejumaanku waa inuu noqdaa qof dhexdhexaad ah iina sheegaa waxkasta oo la isdhaafsado inta kulanku socdo. Waa inuusan turjumaanku wax kareebin waxna kudarin hadalka qofkale yiraahdo. Dugsiga ayaa xaqiijinaaya in turjumaanadu fahmaan doorkooda iyo baahida looqabo inay macluumaadka sirnimadiisa dhawraan. TUrjumaanada ayaa noqon kara kuwo sitoos ah goobta usoo xaadira ama taleefanka turjumaada soomariya.

Macluumaadka Qoran
Dugsiga ayaa turjumaaya macluumaadka muhiimka ah ee qoran una badalaaya luuqadaha ugu badan ee degmadeena dugsiga looga hadlo. Hadii laguusoo diro macluumaad aan kuqornayn luuqadaada, fadlan usoo sheeg dugsiga hadaad doonayso in laguu turjumo ama si cod ahana laguugu sharxo luqadaada hooyo.

Maqabtaa wax su'aalo ama walaacyo ah? Ma ubaahantahay taageero?

Hadaad qabto wax su'aalo ah ama aad doonayso inaad codsato turjumaan ama macluumaad turjuman, ***dugsigaaga ayaa kucaawinaaya***.
Wixii macluumaad dheeri ah waxaad booqan kartaa barta Turjumaada iy Fasiraada ee Boston Public Schools.

Wax kaqabashada walaacyada iyo cabashooyinka

Kuwaani waa xaquuqdaada!
Sida kucad sharciyada Xaquuqda Madaniga ah ee gobalka iyo heer Federaal, waxaad xaq uleedahay helitaanka macluumaadka oo kuqoran luuqaaada hooyo.

Kacodso xafiiska guud inay kusiiyaan koobiga xeerka iyo nidaamka heltaanka luuqada ee degmada. Waxaad sidoo kale ka akhrisan kartaa oonleenka:

https://www.bostonpublicschools.org/translation-interpretation

Walaacyada iyo cabashooyinka
Hadaad walaac kaqabto adeegyada turjumaada iyo fasiraada ee dugsiga—ama hadaan lagu siin turjumaanka iyo turjumaada aad ubaahantahay—waxaad haysataa dookhyada kaladuwan.

1. **Lahadal maamulaha ama shaqaalaha dugsigaaga ee aad kuqanacsantahay.** Dood aad layeelato maamulaha dugsigaaga ayaa caadiyan ah talaabada ugu fiican ee wax looga qaban karo cabashooyinkaaga. Sharaxaad kabixi wixii dhacay, kadibna udaa maamulaha inuu sameeyo wuxuu qaban karo si dhibaatada looxaliyo.

2. **Lahadal degmada dugsigaaga.** Waxaad laxariiri kartaa degmada dugsiga si aad ula wadaagto walaacyada aad qabto ama macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xaquuqdaada.

Xafiiska Sinaanta
1-617-635-9650 (Taleefanka), 617-635-7940 (Fax) | **www.bostonpublicschools.org/equity**

Talo Bixiyaha Degmada – Carolyn MacNeil
1-617-635-9054 (Taleefanka), 1-857-891-1363 (Talefanka Gacanta) | **cmacneil@bostonpublicschools.org**

Xafiiska Baryaasha Ingiriiska – Agaasimaha Adeegyada Turjumaada iyo Fasiraada
1-617-635-9435 (Taleefanka) | **adowling@bostonpublicschools.org**

3. **Waxaad gudbin kartaa cabasho.** Soodiyaarso cabsho, adoo kusharxaaya wixii dhacay—kuna qoraaya luuqada aad kuhadasho—kadibna boostada ugu dir Degmada, si toos ah ukeen xafiiska ama email ugudir **(tandicomplaints@bostonpublicschools.org)**. Waxaa intaas siidheer, foomka cabashada ayaad kubuuxinaysaa oonleen ahaan adoo galaaya Barta Waalidka qaybta Lifaaqa Degdega ah ee barteena. Xaqiiji inaad haysato koobiga diiwaanadaada.

   Ciwaanka:
   Boston Public Schools
   Office of English Learners
   Translation & Interpretation Unit
   2300 Washington Street
   Roxbury, MA 02119
   Attn: Director of Translation & Interpretation

Degmada ayaa baaraysa cabashadaada kadiba si qoraal ah kuugusoo jawaabaysa.

Fadlan xasuusnoow in Boston Public Schools aysan kaaga aargoosanayn ama cunugaaga uga aargoosanayn inaad walaacyadaada soo gudbiso ama cabasho soo gudbiso.